

SANDUUQA XAALADDA DEG-DEGGU HAKUU DIYAARSANAADO



Xaaladaha deg-degga ah, waxaa dhici karta inaad haysato ogesysiis daqiiqad ah oo aad ka guurto. Waa kuwan qaar ka mid ah waxyaabaha lasoo jeediyey in laga fekero.



LIISKA WAXYAALAH AAD DIYAARSANAYSO

- ☐ Saad saddex maalmood kugu filan oo biyaha caagadaha ah (hal galaan qofkiiba maaliintii)
- ☐ Sanduuqa gargaarka degdegga ah, daawooyinka muhiimka ah iyo muraayadaha indhaha
- ☐ Saad saddex maalmood kugu filan oo ah cunto bushqadaysan, qalalan oo qasaasacadaysan
- ☐ Qalabka qasaacadaha lagu furo oo gacanta la adeegsado
- ☐ Cuntada iyo qafaska rabbaayadaha
- ☐ Raadiyow iyo tooshash fudud oo wata baatariyo dheeraad ah oo ku jira baco ayna biyuhu galayn
- ☐ Furayaasha baabuurka oo dheeraad ah, lacag cad iyo kiridhit kaadho
- ☐ Waxyaabo u gaar ah dhallaanka
- ☐ Taleefanka gacanta oo wata dabeeyayaal iyo baatariyo dheeraad ah
- ☐ Siiri aad caawimada ugu yeerato
- ☐ Baag dhar ah iyo agabka suuliga oo intaad maqan tahay kugu filan
- ☐ Afsaabka wejiga
- ☐ Gacmo nadiifiye
- ☐ Dab damiye
- ☐ Dokumentiyada muhiimka ah

WAXYAABAH DADKA WAAYEELKA AH IYO KUWA NAAFADA AH

- ☐ Qalabka caafimaadka (oo ay ku jiraan batariyo iyo dabeeyayaal)
- ☐ Daawooyinka dhakhtarka
- ☐ Liis ah bixiyayaasha agabka caafimaadka, farmasiyada iyo aaladaha caafimaadka, kuwaasoo ay ku jiraan lambarada taleefanada
- ☐ Nuqulada daawooyinka dhakhtarku qoray, amarada dhakhtarka iyo lambarada taxanaha ah ee aaladaha caafimaadka
- ☐ Muraayadaha indhaha oo dheeraad ah iyo kaabayaasha maqalka (ku dar baatariyo dheeraad ah)
- ☐ Astaamaha ama shuuliyadaha digniinta caafimaadka ama sharraxaadda qoran ee naafonimadaada iyo/ama baahiyahaaga haddii aadan awoodin inaad sharraxdo xaaladdu siday tahay xaalad deg-deg ah
- ☐ Teknoolojiyadda wax caawia iyo/ama qalabka isgaarsiinta
- ☐ Guryeyn la heli karo
- ☐ Xayawaanka adeega

Qorshaha badbaadada kuwaasoo wata talooyin, fiidyawyo ahaaneed iyo liisas hubin ka eeg halkan sdge.com/emergency.

Nagala soco:



MACLUUMAADKA MASIIBADA

Xaaladda deg-degga ah, waxa ugu muhiimsan ee aad samayn karto inaad diyaargarawdo.

SDG&E®

Wac **1-800-411-7343** ama booqo **sdge.com/safety** si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Xarumaha Macluumaadka Bulshada

Inta lagu jiro wakhtiga dheeraadka ah ee u Daminta Korontada Dadwaynaha Qaab Badbaado ah, waxaanu furi doonaa xarumaha macluumaadka. Ka raadi xarun macluumaad halkan **sdge.com/resource-centers**.

Ready San Diego

Xafiiska Degmada ee Adeegyada Deg-degga. Isku diiwaangeli wargelinaha maaddaama ay dhici karto xaalad Deg-deg ah: **readysandiego.org**

Soo dejiso barnaamijka Xaaladda Deg-degga ah SD

<https://www.readysandiego.org/SDEmergencyApp/>



**& BADBAADADA
DABKA KEYNTA**

Laanqayrta Cas ee Maraykanka

San Diego/Imperial Counties Chapter.
Caawimada kahor, inta lagu jiro iyo kadib xaaladaha deg-degga ah.
San Diego/Degmooyinka Imbaradooriyadda: **redcross.org/sandiego**
Degmada Orange **redcross.org/oc**

211 Khadka Tooska ah

SDG&E iyo 211 waxay iska kaashadeen inay bixiyaan macluumaad iyo adeegyo habboon si ay u kordhiyaan isdiyaarinta iyo adkaysiga qofka inta lagu jiro PSPS iyo xaaladaha deg-degga ah. Adeegyada waxa ka mid noqon kara caawimada gaadiidka, quwad kayd ah, waxyaabaha la xirira isdiyaarinta, sugnaanta cuntada, gabbaad kumeel gaar ah iyo hubinta caafimaadka. Hawlwadeen toos loo heli karo ayaa kaa caawin kara inaad hesho waxaad u baahan tahay adigoo goobtaada ku sugan, si sahlan u garaac 211.

News Radio AM 1600 KOGO

Inta xaaladda deg-deggu socoto, ka dhagayso KOGO wararkii u dambeeyey.

WAC 911

**LOOGU TALOGALAY XAALADAHA
DEG-DEGGA EE BILAYSKA, DABKA
& CAAFIMAADKA**